

Cula Dayuub

# NAFTAYDAAY GACALO

Naftaada sida aad ula hadasho ayaa  
micnaha dhabta ah samaynaya

Turjume  
Maxamed-Qaamuus

# **NAFTAYDAA Y GACALO**

## **Cula Dayuub**

**Turjume: Maxamed-Qaamuus**

PDF Version: [www.cilmiyebooks.com](http://www.cilmiyebooks.com)

Xuquuqda turjumaadda © Maxamed-Qaamuus 2023.

Xuquuqda oo dhan way dhowran tahay. Buuggan ama qayb ka mid ah lama daabaci karo, lamana tarjuman karo la'aanta idan qoran oo laga helo turjumaha.

Copyright©Maxamed-Qaamuus 2023.

All rights reserved. No part of this publication may be reproduced, stored in any retrieval system, or transmitted in any form or by any means, including photocopying, recording, or other electronic or mechanical methods, without the prior written permission of the translator.

Daabacadda 1aad Hargeysa, 2023

Qaabaynta Jeldiga: Sharmaarke Muumin

Qalinmaal Publishing

Tel: +252-63 3333755

qalinmaal@qalinmaalpublishing.com

[www.qalinmaalpublishing.com](http://www.qalinmaalpublishing.com)

## **Hordhaca turjumaaga**

Buugta naf-la-hadalka ah aad ayay inoogu yar yihiin soomaali ahaan (ama ma jiraanba), ha ahaato kuwo aynu qornay ama kuwo aynu luuqado kale ka soo turjunnayba e. Dhab ahaanna waa kaalin bannaan, waayo buugta mawduucyadaas ka hadlaa waa kuwo ina bari kara sida habboon ee aynu nafteenna ula sheekaysan karno, sida aynu u dhiirrigelin karno, sida aynu ugu tilmaami karno khaladaadkeeda innaga oo aan xaganaynin, iyo sida aynu xasillooni u abuuran lahayn nafteennana heshiis ula noqon lahayn. Buuggan Dear Me, Afsoomaali ahaanna aannu u bixinnay "Naftaydaay Gacalo", waa buug buuxin kara kaalintaas; waa buug fudud, nafta ula hadlaya una hagaya sida ugu debecsan; waa buug macaan oo aanad ku caajisaynin; aadna u kooban. Waa buug qofka raba akhriska inuu hadda bilaabo barbilaw u noqon kara, qofka akhriska ka caajisayna ku soo celin kara, akhristaha sida joogtada ah wax u akhriyaana uu kaga nasan karo mawduucyada culus ee fekerka iyo rognosista u baahan, waana buug aad hal fadhi ku dhamayn karto. Si kasta oo uu buug fudud oo sahlan u yahay, haddana waa buug qofka si mug leh u dhuuxaa uu kala bixi karo casharro nololeed, casharro aad u badan. Waa buug ku xasuusinaya mustaqbalka quruxda badan ee ku sugaya, haddana kugu boorrinaya inaanad ka mashquulin nimcooyinka aad hadda haysato ee hortaada ka muuqda, iyo sida ay tahay inaad maalinkasta ugu noolaato sida ugu quruxda badan. Waa buug qalbiga taabanaya, la sheekaysanaya, dibna idiin wada fadhiisin doona naftaadi aad kala baaddeen, ee ay idin kala mashquuliyeen waayaha adduun iyo isgaadhsiintan casriga ahi! Ugu danbayn, waa buug aan ka helay, naftayda la jeclaaday, sidaas darteed ayaan u soo turjumay oo aan idinkana idiin la jeclaaday. Ku raaxaysta akhrsikiisa.

**Maxamed-Qaamuus**

## Hordhac

Inta u dhexaysa bilawga maalinteenna iyo dhammaadkeeda in badan ayaynu la hadalnaa nafteenna, laakiin sidee ayaynu ula hadalnaa? Ma ula dhaqannaa nafteenna si debecsanaan iyo wanaag ku jiro sida aynu ula dhaqanno saaxiibadeen, mise waxa aynu ula dhaqannaa si qallafsan oo canaan leh sida ay tahay cadaw daran ama qof danbiile ah oo u sabab ah dhammaan xaaladaha aynu ku sugannahay?!

Halkan ayay ka timi fikradda buuggani, si uu "Naftaydaay Gacalo" u noqdo buug u dhexeeya qofka iyo naftiisa, gudahiisana waxa ku duugan farriimo iyo hadallo badan oo uu qofku kula hadi karo naftiisa, islamarkaana uu ugala sheekaysan karo mawduucyo kala duwan, isaga oo [buuggani] soo gudbinaya habab togan oo ay tahay in nafta loola hadlo si kor loogu qaado niyaddeeda iyo adkaysigeeda, islamarkaana qofku uu ugu baraarugo khaladaadka ay naftiisu ku dhacayso. Haa, "Naftaydaay Gacalo" waa buug akhristaha ku hagaya in uu naftiisa ula hadlo si debecsanaan iyo run ku dhisan, mana aha uun buug tudhaale ah oo nafta sax iyo khaladba la safan, ee sidoo kale waa mid ka caawinaya qofka sidii uu u noolaan lahaa nolol habboon oo macno leh.

**Cula Dayuub**

**Dear Me**  
**(Naftaydaay Gacalo)**

“

**Tallaabada ugu horraysa ee  
xaqiiqinta riyoooyinkagu waa in  
aad hurdada ka toostid.**

”

Naftaydaay gacalo:

Maanta waa maalin cusub! Waa maalin aanad hore u arkin, dibna u arki doonin; sidaas darteed jooji in aad naftaada ku maaweeliso beenaha aad markasta u sheegto! Imisa maalmood oo hore ayaa dhayal kugu dhaafay?

Ka faai'dayso maalintan cusub ee ashqaraarka leh maalmaha kalena ka duwan. Ogsoonow - maalinta quruxda badan gudaheeda - in aad haysato fursado tiro badan oo aad nolashaada ugu jihayn kartid dhan kasta oo aad rabto.

Waan ku jeclahay marwalba naftaydaay.



“

**tagtayahay qaaliga ahi, waad  
ku mahadsan tahay  
casharrada aad i soo siisay oo  
dhan, mustaqbalyahow  
cajiibka ahi, si weyn ayaan  
adna diyaar kuugu ahay.**

”

Naftaydaay gacalo:

Waxa aynu isugu xidhiidhsannahay si cajiib ah oo aan cidina fahmaynin, islamarkaana fahmi doonin. hal dhinac ayaynu nolosha uga soo wada jeednaa, ama in aynu sidaas ahaanno ayay ahayd, laakiin mar dhexe ayaan kaa tegay:

Keligaa ayaan kaa tegay adiga oo isku dhex daadsan; waxa aan kugu kellifay in aad dad shisheeye ah ka sugto oo ka raadsato jacayl dhiirrigelin iyo awood. Iyada oo ay ahayd in aan anigu ku garab istaago, oo aan ku soo dhowaysto ku amaano islamarkaana aan kugu qaddariyo shakhsiyaddaada xariirta ah iyo quruxda iyo milgaha aad nolosha ku soo biirinayso.

Waan ka xumahay in aad igu hungowday, waan ka xumahay in aan ku xanuujiyay oo ku dayacay, waan ka xumahay in aanan ku xasuusin hadh iyo habeen sida aad u tahay qof qaali ah, ee aad u tahay qof waxkasta oo wanaagsan u qalma, una tahay qof geesi ah naxariis badan misana awood leh oo adkaysi badan. Iska kay cafi naftaydaay!

Sida aynu nahay ayaynu qiimo ku leennahay; mustaqbalka soo socda waynu wada waajihi doonaa; hadda waan ku helay, waan is helay, marnaba gacantaada ma sii deyn doono. Markan waxa aan ku siin doonaa mudnaanta koowaad iyo kaalinta ugu sarraysa kaalmaha noloshayda. Waan ku ixtiraami doonaa, waan ku karaamayn doonaa, oo ku qiimayn doonaa welibana ku jeclaan doonaa.

Daacad baan kuu ahay markasta naftaydaay.

“

**Naftaydaay gacalo, Noqo qof  
debecsan, maxaa yeelay qof  
kasta waxa uu la tacaalayaa  
dagaalkiisa gaarka ah kaas oo  
aanad adigu waxba kala  
socon.**

”

Naftaydaay gacalo:

Waxkasta si shakhsi ah ha u qaadan, ha na moodin in adiga lagu dan leeyahay, cidna ha ka yeelin in ay ku liiddo oo hoos kuu dhigto. Inta badan waxyaabaha dhacayaa adiga kuguma saabsana, ee waa kuwo ku tacaluqa qofka kale iyo cilladihiisa gudaha. Marka ay dadku dhaawac kuu geystaan, ka eeg arrinta dhankooda booskoodana isdhig, iskana cafi; wax ka baro hab-dhaqannadooda khaldan; arrintana wax dhacay oo aan dib u noqosho lahayn ka soo qaad. Ogowna, wax waliba in aanay ahayn sida ay u muuqdaan.

Sidaada ayaad ku fiican tahay, cilladahaaga iyo iimahaagu xitaa waa kuwo qurux badan. Aqbal waxyaabaha aanad kaga fiicnayn dadka kale, oo ku dhegganow waxyaabaha aad kaga soocan tahay iyaga.

Marwalba daacad baan kuu ahaan doonaa naftaydaay

“

**Ugu yaraan naftaada ula  
dhaqan sida wanaagsan ee  
aad dadka kale ula dhaqanto.**

”

Naftaydaay gacalo:

Qalbigaaga si debecsan ula dhaqan, inta karaankaaga ah waad qabataa, xitaa marka aanad dedaal badan samaynin, naftaada cafi oo ha ku ad'adkaan. Ku jeclow naftaada xaalad kasta, waayo jacaylka oo qudha ayaa wax dawweeya.

Si kasta waan kugu jeclahay naftaydaay.

“

**Naftaydaay gacalo, si kasta  
oo ay xaaladuhu u  
adkaadaan, ha luminin  
dareenkaaga xasilloonida  
jacaylka iyo rajada ah.**

”

Naftaydaay gacalo:

Mararka qaar Ilaahay innama siiyo wax aynu weyddiisannay, si uu inoogu beddelo wax kale oo ka sii wanaagsan. Marar badan ma garan karno sababta ducooyinkeenna qaar loo aqbalo kuwo kalena loo aqbali waayo. Waxa qudha ee aan ogahay waa in Ilaahay uu ina jecel yahay, qaddarkeennana uu inoo jeexay isagu; marar badanna innaga oo aan xitaa fahansanayn sida ay wax u dhici doonaan waa in aynu ku kalsoonaanna.

Ku noolow noloshaada jacayl, oo ku kalsoonow Ilaahay si uu kuugu hanuuniyo waddada saxda ah.

Wanaag badan ayaan kuu rajaynayaa naftaydaay.



“

**mararka qaar waaba adiga  
uun cidda qudha ee  
noloshada caqabadda ku  
ahi.**

”

Naftaydaay gacalo:

Oggolow in aad isbiimayso, oggolow in aad halista u badheedho! Khaladaad waad samayn doontaa kollayba, oo taas la iskama ilaalin karo, laakiin khaladaadkaaga wax ka baro. Oggolow in aad noolaato, oggolow in aad xor noqoto, waxna ha uga walaacin ama ha iskaga deyn in aad keliya ka baqayso guuldarrada ama in qof kuu hanweynaa uu kugu hungoobo; qofka qudha ee ay tahay in aad farxad gelisaa waa isla naftaada, ee raadi farxaddaas, oo hel hadafkaaga nololeed, saaxiibbo fiicanna samayso inta aad ku jirto safarkaaga, saaxiibbo aad wax wada qaybsataan.

Isjeclow, jeclow qofka aad tahay, dadka oo dhanna jeclow. Hel qofka aad rabto in aad noqoto, kuna dhegganoow waxyaabaha kaa farxiya, casharrada nolosha aad la kulantana tixgelin weyn sii.

Nasiib wanaagsan naftaydaay.

“

**Naftaydaay gacalo, Waa in  
aad barataa sida naftaada loo  
jeclaado, ka hor inta aanad  
cid kale jeclaan.**

”

Naftaydaay gacalo:

In lagu diidaa waa wax xanuun badan, sidaas darteed dhib ma leh in aad xanuun dareento, aniguna marwalba garabkaaga ayaan ahay.

Xanuun kasta garabkaaga ayaan ahay naftaydaay.

“

**Waad u qalantaa naftaydaay,  
ee noqo mucjiso mar-la-arag  
ah.**

”

Naftaydaay gacalo:

Dadka qaar uma soo galaan noloshaada in ay ku jeclaadaan, ee waxa ay ugu soo biiraan in ay kugu danaystaan! Kuuma arkaan qof ee waxa ay kuu arkaan fursad, sidaa darteed wax caawimo ah kuuma fidiyaan si kasta oo aad adigu u caawisid. Jooji in aad dhinaca aad ka xigto gufayso dad iyagu dhinacoodi kugu banneeyay!

Waan ogahay in aad moodayso garab istaagooda in aad u baahan tahay, laakiin dhab ahaan uma baahnid garab istaagooda! Yaan caawimo la'aantoodu kaa dhigin mid ka aamin baxda dadka oo dhan. Ka agdhowow dadka doonaya in ay ku caawiyaan si aad u horumariso noloshaada, kana fogow kuwa kuugu soo dhowaanaya si ay kuugu hormarsadaan noloshooda!

Waan ku fahmayaa, oo waxa aad odhan doontaa: yaa i caawin doona haddaa?! Dad badan ayaa diyaar u ah in ay ku garab istaagaan; sidaa darteed kuwa aan rabin in ay ku garab istaagaan yaanay kaa qarin kuwaas. Hadalkaygana aan caddeeyee: marna ha ka qoomayn in aad xidhiidhka u jartay qof isagu kelifay goynta xidhiidhkaas.

Jacaylkayga ayaa kula jira markasta naftaydaay.

“

**Ha samaynin waxkasta oo aad  
hadhow ka qoomamayn  
doontid.**

”

Naftaydaay gacalo:

Xorriyaddu waa mid ka mid ah nimcooyinka quruxda badan ee uu Ilaahay innagu mannaystay; si kasta oo aynu isu diidsiinnana nolosha waxa aynu nahay kuwo xor ah. Xor ayaynu u nahay waxa aynu ka fekeraynno, xor ayaynu u nahay waxa aynu dareemaynno, xor ayaynu u nahay waxa aynu odhanaynno, sidoo kalena xor ayaynu u nahay waxa aynu samaynaynno. Waa run in mararka qaar ay nolosha innagu khasbi karto duruufo adag, sidaas oo ay tahayna xor ayaynu u nahay sida aynu uga falcelinaynno duruufahaas.

Ha dafirin xornimadaada ee ku farax, qaddari oo maamuus, maalin kastana adeegso oo ka faa'idayso. Xasuusnow, xor in aad u tahay abuuridda qaab nololeedka aad weligaaba ku hammin jirtay, doorashadana adiga ayaa markasta leh; sidaas darteed ka buuxi noloshaada debecsanaan, wanaag, madaddaalo, farxad, xasillooni, dhoollacaddayn, jacayl iyo waxkasta oo wanaagsan.

Waxa aan rajaynayaa in aad xornimo ku noolaato, si waayo aragnimo leh aad wax u doorato, si deeqsinnimo lehna aad wanaagyada ula qaybsatid dadka kale; wanaagyada ay noloshu kuugu deeqday. Waxa aan rajaynayaa in aad xorriyaddaada uga faa'idaysato in aad kaga dhigto noloshaada gaarka ah mid adiga iyo dunida kaleba idin anfacda.

Xaq ayaad u leedahay xornimada naftaydaay.



“

**Waan ogahay culayskan oo  
dhan in uu yahay mid ku  
meel-gaadh ah.**

”

Qalbigaygiyow gacalle:

Raalligelin ha ka bixin in aad dareemayso dareen gaar ah ama aad dareemayso dareemo badan, xaq ayaad u leedahay in aad dareento waxkasta oo aad rabto!

Waan ku jeclahay marwalba.

“

**Dhib maleh in aad keligaa  
noqotid xilliyada qaar, waayo  
kelinnimadu marar badan  
waxa ay ku siisaa awood iyo  
geesinnimo.**

”

Naftaydaay gacalo:

"Is heliddu" ma aha in aad si dhab ah isu raadisid oo aad isa soo heshid. Waayo ma tihid alaab yar oo meel lagu qariyay kadibna dib loo raadiyay, qof anbadayna ma tihid. Naftaada dhabta ahi waxa ay ku sugan tahay meeshaas ay ku kulmeen, qiyamka bulshada iyo dabarradoodu, aragtida dadka kale iyo ra'yigoodu, iyo natiijooyinka aan xaqiiqada ku fadhiyin ee aad qudhaada ka aamintay markii aad yarayd, imminkana aad u aragto shakhsiyaddaada dhabta ah.

Is heliddu dhab ahaan waa dib ugu noqoshada naftaada; waa illawga wixii aad soo baratay oo dhan, iyo qodqodista gudahaaga, iyo dib-u-xasuusashada qofkii aad ahayd ka hor inta aan dunidu kuu talin!

Nasiib wanaagsan naftaydaay.

“

**Cabsidu maaha in aanad  
doonaynin in aad  
waxsamayso, cabsidu waa in  
aad ogaato halistu in ay  
badan tahay, haddana aad og  
tahay waxa aad samaynaysaa  
in ayu qalmaan u  
badheedhidda halistaas.**

”

Naftaydaay gacalo:

Haddii aad arrin u samaynayso si ay dadku kuula dhacaan ama kuugu bogaan marka aad samayso kadib, uma samaynaysid sabab sax ah!

Waxyaabaha aad samaynaysid adiga oo ka cabsanaya in dadka qaar kugu jeesjeesaan marka aad samaynayso waa waxa jaangooya himiladaada dhabta ah. Sidaas darteed, samee waxyaabaha ku cabsi geliya, si kasta oo aad uga baqaysid in dadku kula yaabaan, waayo in lagula yaabo" wax dhab ah maaha. Dadka aad ka baqayso in ay kula yaabaanna, iyagii ayaa baqaya, oo in ay tallaabo hore u qaadaan ka cabsanaya. In aad ka cagajiiddo samaynta waxyaabaha ku cabsi gelinayaa, waa wax aad dhab ahaan ka qoomamayn doonto.

Jacaylkayga ayaa kula jira naftaydaay.

“

**Dib u qiimee naftaada  
markasta, sanad kasta, bil  
kasta iyo xitaa maalin kasta,  
si aad u hubiso in aad weli  
doonayso waxyaabihii aad  
aaminsanayd in aad u baahan  
tahay, iyo inaad hore u  
soconaysaba.**

”

Naftaydaay gacalo:

Maalin walba xasuusnow:

Weli maad gaadhin meeshii aad u socotay, ee hubkaaga ha dhigin (ha is dhigan ); ku dabaaldeg guulahaaga yaryar horena u soco, waayo noloshu waa socdaal.

Garabkaaga ayaan ahay safarka oo dhan.



“

**In aad farxad abuurato ka  
dhigo ujeedo maalinle ah oo  
sii mudnaan joogto ah.**

”

Naftaydaay gacalo:

Weli waddada hortaydu way dheer tahay, laakiin waxa aan go'aansaday in aanan marnaba joojin socodka. Marwalba nolosha dhibaatooyin ayaa jiri doona, sidoo kalena marwalba laba albaab oo aad kala dooranayso ayaa jiri doona: in aad noolaato nolol aan farxad lahayn adiga oo tirinaya mashaakilkaaga ama in aad noolaato nolol farxadi ku dheehan tahay adiga oo tirinaya nimcooyinkaaga. Albaabkaas aad dooranayso ayaa go'aamin doona in aad farxad la duuli doonto iyo in aad xabsi murugo ah geli doonto.

Jacaylkayga adigaa iska leh naftaydaay.

“

**Naftaydaay gacalo, maanta in  
aad daciif tahay, micnaheedu  
maaha maalin kasta in aad  
daciif ahaanayso.**

”

Naftaydaay gacalo:

Xirfadda ugu muhiimsani waa in aad hesho waddada saxda ah kadib marka ay soo oodmaan rajooyinka oo dhami; maadaama ay fududdahay in aad ku lunto mugdiga, iyo in aad noqoto mid niyadjabsan marka ay kuu rumoobi waayaan riyoooyinkaagu, ama marka ay riyoooyinkagu kuu hirgalaan laakiin aanay ku siinnin waxyaabihii aad ka rajaynaysay.

Awoodda adiga oo isdhiibi gaadhay aad gogoshaada dusheeda ka ooyayso, adiga oo aan garanaynin wixii aad samayn lahayn, haddana aad kor u taagayso gacmahaaga adiga oo Ilaahay weydiisanaya in uu kuu ifiyo waddada hortaada ah, dhab ahaan waa xirfad weyn oo aanay dadku si weyn u qaddarin.

Mararka qaar sida qudha ee aad hore ugu dhaqaaqi kartaa waa inaad qirato guulddarada; inaad aqbasho in aad tahay bina'aadan uun, oo aanad garanaynin inta badan waxyaabaha dhacaya, kadibna aad si weyn u ilmaysid ilaa aad dareentid fiicnaan ama aad heshid waddo cusub.

Marwalba waan ku jeclaanayaa naftaydaay.

“

**Iska sii daa, wax ka qurux  
badan ayaa booskiisi kuu  
buuxin doona e!**

”

Naftaydaay gacalo Fiir gaar ah:

Xasuusnow marka aad xal u weydo mushkilad gaar ah, sida ay u badan tahay ma aha mushkilad la xallin karo, ee waa xaqiiqo ay tahay in aad sideeda ku aqbasho!

Jaahwareer kasta garabkaaga ayaan ahay naftaydaay.

“

**Naftaydaay gacalo: ha waayin  
dunwanaagsanaantaada si  
kasta oo ay duruufuhu kuugu  
adkaadaan.**

”

Qofka aan noqon doono mustaqbalkoow:

Waxkasta oo kugu soo dhacay waxa ay kugu hoggaamiyeen in aad timaaddo halkan. Waxba ha beddelin, waayo waxkasta waxa ay u dhaceen sidii loogu talagalay. Arrimaha oo dhan waa ay kala caddaadeen, wax walbaana waxa ay noqdeen kuwo muuqda. Wax qoran ayay ahayd in dadkaas oo dhan ay soo maraan noloshaada, dhammaan guulihii iyo guuldarrooyinkii ku soo marayna sidoo kale, xaaladihii jacaylka iyo waqtiyadii qalbijabkuna waxa ay ahaayeen wax ay ahayd in aad soo dhadhamiso.

Wax mudan ayay ahaayeen in la soo tijaabiyo; ha ka qoomamayn. Weligaa wax aad ahayd ahaanna doontaa qofka aad hadda tahay, taas ayaana waxkasta ka muhiimsan.

Jacaylkayga iyo ixtiraamkayga ayaa kula jira naftaydaay.



“

**Naftaydaay gacalo, ma jiro  
wax ka qurux badan oo ka  
iftiin badan qalbiga  
wanaagsan.**

”

Naftaydaay gacalo:

Waad ka qurux badan tahay sida aad isu malaynayso!

Xoog ayaad ugu waalan tahay lebbiska quruxda iyo dhammaan waxyaabaha ay dumarku xiiseeyaan, laakiin waxa aad u oggolaataa waxyaabahaasi in ay maskaxdaada u qabsadaan si kabad badis ah oo ay ku wareeriyaan. Hal maalin iska tirtir dhammaan make-upka iyo waxyaabaha aad wejigaaga marisay, waxa aad arkaysaa in quruxdaadu ay ka soo burqanayso gudahaaga.

Run ahaan, ma noqon doontid gabadha ugu quruxda badan, marwalba waxa jiri doonta cid kaa qurux badan, waayo quruxdu waa arrin qof iyo qiimayntii ah, dadkuna marnaba iskuma waafaqaan waxa ay quruxdu tahay, laakiin dadka oo dhami waxa ay jecel yihiin ruuxda quruxda badan, adiguna qaalidaydiyeey waxa aad leedahay ruux qurux badan, ee ha ka ogolaan mugdiga dunidan aynu ku noolnahay in uu ku hadheeyo noloshaadana uu ka dhigo mid qadhaadh.

Daacad baan kuu ahay naftaydaay.

“

**Haddii aad raadinayso qofkii  
nolashaada beddeli lahaa,  
eeg muraayadda hortaada!**

”

Naftaydaay gacalo:

Arrinta oo dhan waxa ay ka bilaabantaa hal go'aan; go'aan ah in aad joojiso waxaas; go'aan ah in aad hore u socoto; go'aan ah in aad noqoto qof geesi ah si kasta oo aad u cabsanayso; go'aan ah in aad qubto oo ka gudubto wixii hore oo dhan. Intaas kadib ayay tallaabada labaad noqonaysaa in aad go'aankaas ku taagnaato. Labadaas arrina in aad go'aan gaadhid iyo in aad ku taagnaatid cidina kaama furan karto; waa hawl adiga kuu taalla!

Jacaylkayga ayaad xaq u heshay naftaydaay.

“

**Ku farax in aad nooshahay oo  
neefsanayso; in aad maalin  
kale soo toosto adiga oo nool  
waa wax weyn, yaanay kula  
sahlanaanin.**

”

Naftaydaay gacalo:

Waa wax fican in aad noqoto qof xidig ah oo ay dadku la wada ashqaraaraan, laakiin waxa marar badan ka xasillooni badan in aanad ahayn qof deyn lagu leeyahay, xoogaa lacag ahi ay bangiga kuugu jirto, oo aad ku nooshahay xaalad ammaan ah oo aanad ka werweraynin dhaqaale xumo iyo in aad wax weydo. Mararka qaar waxa muhiim ah keliya in aad caafimaad qabto, dharkaaga aad maydhato, cunto hagaagsan aad cunto, si wanaagsan aad u qubaysato, meesha aad deggan tahayna aad iska nadiifiso, halkii aad hami weyn oo nolosha ah xaqiijin lahayn.

Daacad baan kuu ahay naftaydaay.

“

**Naftaydaay gacalo, dadka  
badankoodu ma bogsadaan  
maadaama ay xasuusihii hore  
maskaxdooda ku soo  
celcelinayaan, ee ka gudub  
arrinta ku dhibaysa.**

”

Naftaydaay gacalo:

Khasab maaha qof kasta oo aad la kulanto noloshu in uu garabkaaga joogo inta ka dhiman noloshaada; dad ayaa ka tegi doona, adiguna sidaa si la mid ah dad ayaad ka tegi doontaa. Dad badan ayaad ku hungoobi doontaa, waxa qudha ee aad samayn kartaana waa in aad ka faa'idaysato casharradii ay ku bareen; sidaa darteed u mahad celi dadka joogay ee aan kaa dheeraan, sidoo kalena buuxi booska kuwa ka baxay noloshaada.

Ta ugu muhiimsanina waa in aad si laabxaadhnaan ah uga gudubto dadka iyo waxyaabaha aanay qornayn in ay noloshaada ku sii jiraan, oo aad u aqbasho waaqica sida uu yahay.

Wax badan oo wanaagsan ayaan kuu rajaynayaa naftaydaay.



“

**Markasta oo uu safarka figta  
sare sii adkaado, ha illaawin  
in aad naftaada ku faanto.**

”

Naftaydaay gacalo:

Markasta ha ka werwerin qofka daacadda ah kuu ah iyo cidda aad ku kalsoonaan karto. Ha dhowaato ama ha dheeraato e dadku way muujin doonaan wejigooda dhabta ah, marka aad aragto wax arrintaas kuu caddaynayana markiiba aqoonso oo dadka ku kala qiimee. Ku kalsoonow dareenka gudaha ee kuu sheegaya shakhsiyadda dhabta ah ee dadka, iyo dareenka ay ku dareensiinayaan. Marka horaba waad garanaysaa cidda ay tahay in aad noloshaada boos ka siiso iyo cidda ay tahay in aad bannaanka uga saarto.

Nasiib wanaagsan naftaydaay.

“

**La innama siinin nolol xun iyo mid wanaagsan toona, Ilaahay waxa uu ina siiyay nolol uun, innaga ayay inoo taallaa in aynu ka dhiganno nolol qurux badan ama mid xun.**

”

Naftaydaay gacalo:

Waxa aynu joognaa sanadka 2034, waa taariikh aan is lahaa weligaa ku arki maysid meel aan ka ahayn filimada khiyaaliga ah ee ka warrama tegista mustaqbalka. Hadda waxa aan jiraa 70 sano, ama aan iska dhaho waxa aynu jirnaa 70 sano. Hambalyo labadeennaba maadaama aynu soo gaadhnay da'dan. Qoyskeennu waa mid qurux badan, caruurtuna sidoo kale. Waan xasuusanahay [naftaydaay] markii aad aasaasday qoyskan sida aad u ahayd mid taag daran, sida uga werweraysay biilasha iyo xaaladda dhaqaale, in aad noqoto nin biilka reerkiisa ka adkaada, iyo xaaladdii jahawareerka ahayd ee ku soo martay markii aad weyday shaqadaadi. Haddii aanad haysan lahayn adkaysiga xaaskaaga jacaylkeeda iyo garab istaaggeeda, kuma aanad guulaysateen in aad xaaladdahaas ka gudubto; sidaa darteed ula dhaqan si wanaagsan marwalba. Arrinta la yaabka lihina waa in wax badani iskood u hagaageen markii aad joojisay in aad waxwalba hagaajiso, taas beddelkeedana aad xoogga saartay in aad dadka kuu dhow la wadaagto arrimahaaga islamarkaasna aad samayso waxyaabo ku anfacaya oo faa'ido kuu leh; marar badan waxa qurux badan in aad waxyaabo badan sidooda iskaga dayso! Haddii aan in uun talo ku siin lahaana waxa aan odhan lahaa: toban mar feker, boqol marna wax rogrog, werwerka aad ka qabto in aad khaladaad samaysidna jooji, hana ku fekerin "ma anaa ku dhaca in aan waxaas sameeyo?!", la kaalay ku-dhac iyo dhiirranaan oo isbeddel macno leh horseed.

Hayaan qurux badan naftaydaay.

“

**Su'aal nafyahay?**

**Miyaad u xiistay qofkaas si  
dhab ah, mise hadda  
ayuunbaad kelinnimo  
dareemaysaa?!**

”

Naftaydaay gacalo:

Waad og tahay in qofkii aad jeclayd uu ku khiyaamay, haddana waxa aad naftaada ku qancinaysaa in waxkasta ay ahaayeen khalad fahan; haddana caddayn kale ayaa hortaada timi: gacaliyahaagi sidaas kuu galay oo wata kuna faanaya jacaylkiisa cusub, isaga oo mooggan baaxadda xanuunka uu kuu geystay. Ha ku dhicin khaladka ah in aad qof xidhiidh ula samayso si aad isugu illawsiiiso kii hore, si aanad naftaada ugu geysan dhaawac ka weyn intii hore, dhibna malaha in aad in muddo ah keligaa ahaato; in aad keligaa tahay waxba u dhimmi mayso dumarnimadaada. Ha degdegin bogso oo waqtigaaga qaado, ugana faa'idayso waqtigaas aad keliga tahay in aad naftaada ku daryeesho kuna barato.

Laga yaabaa odhaahda tidhaahda "wakhtiga ayaa waxkasta daweeya" in ay u muuqato mid aan macno badan lahayn, laakiin waxa macquul ah dadkii hadalkaas yidhi cidda ay doonaanba ha ahaadaane in ay saxnaayeen oo qodob ku taagnaayeen, oo damqashada xanuunku waa ay yaraataa markasta oo waqtigu socdo, xoogaa nasiib iyo adkaysi ah kadibna waxa macquul ah in aad wada bogsato. Laga yaabaa in dhaawacyada qaar ay kaaga tagaan boogo, haddana waynu u adkaysan karnaa boogahaas oo waynu baran karnaa sida loola noolaado innaga oo aan damqanaynin.

Waan ogahay in aanay arrin fudud ahayn, waan ogahay i rumayso, sidoo kalena iga rumayso in arrimahaasi ay hagaagaan markasta oo waqti la siiyo.

Bogsiimo wanaagsan naftaydaay.

“

**Way fiican tahay in aad xawaare sare ku socotid, laakiin sidoo kale waxa iyana muhim ah in aad garanayso xilliga aad cagta dhulka u dhigayso ee aad yara nasanayso.**

”

Naftaydaay gacalo:

Qaado xoogaa waqti ah oo aad ku nasato kuna soo kabato, khasab maaha in aad sidaas oo dhan mashquul u ahaato, oo aad isu kadeedo xilli kasta. Hal tallaabo dib u qaad oo naftaada daryeel, waqtiyadaas aad naftaada gelisayna, dhadhan iyo micno gaar ah ayay u samayn doonaan marka danbe safarkaaga guusha. Isu dheellitir dedaalkaaga iyo nasashadaada noloshaadana ku raaxayso.

Wax xuni kuma haleelaan naftaydaay.



“

**Markasta way ku habboon  
tahay in aad naftaada  
jeclaato in ka badan intii  
hore.**

”

Naftaydaay gacalo:

Ma u fiirsatay sida aad isu beddeshay beryahan danbe?! Aniga ayaa u fiirsaday, dhanka wanaagsan ayaad isu beddeshay. Imminka si kalfuran ayaad uga hadashaa waxyaabaha maskaxdaada ka guuxaya,

caqabadahana waxa aad u waajahdaa si ka kalsooni badan sidii hore. Imminka waxa aad awooddaa in aad u seexato si qoto dheer adiga oo aan werweraynin, iyo in aad madadaalato oo waqtigaaga qaadato adiga oo aan cabsanaynin, iyo in aad fasax u baxdo adiga oo keligaa ah waqtigaagana aad ku raaxaysato iyo kelinnimadaadaba.

Waxa aad kaga qayb qaadataa dedaalkaaga, waqtigaaga iyo lacagta yar ee aad haysato, in aad ku caawiso dadka kale ee adiga kaa sii liita. Si kasta oo aad u dareemayso in kaydkaaga lacageed uu isdhimayo lacag dheeraad ahna aad u baahan tahay, haddana ruuxdaadu sidii hore way ka farxad iyo iftiin badan tahay. Waa isbeddel qurux badan, aniguna waan ku faraxsanahay in aad noqotay qof cusub; bannaanka u soo saar kalsoonidaas iyo quruxdaas gudahaaga ku duugan; isbeddelladaas joogtada ahna samee inta aad ku guda jirto hayaankaagaas nololeed.

Ahow mid awood badan, hana joojin jacaylka iyo bixintiisa, hana joojin in aad dadka kale danayso oo daryeesho. Inta aan wax kale la gaadhinna, ugu horrayn run kula noolow naftaada.

Nolol qurux badan naftaydaay.

“

**Naftaydaay gacalo, waa in aad isku kalsoonaataa marka aanay jirin cid kale oo kugu kalsooni; taas ayaa macnaha dhabta ah samaynaysa ugu danbaynta.**

”

Naftaydaay gacalo:

Miisaanka waxa lagu qeexaa culayska cayiman ee ku sugan gudaha walax cayiman, mana aha wax xidhiidh la leh shakhsiyaddaada, awooddaada iyo qiimahaaga qofnimo toona. Waa run, waa muhim in aad noolaato nolol caafimaadqab leh, waana muhim in aad naftaada daryeesho, laakiin daryeelidda naftaada waxa soo hoos galaysa daryeelidda badqabkaaga maskaxeed.

Iska indhatirka badqabkaaga maskaxeed iyo badqabkaaga jidheedba waxa ay kugu sababi karaan mashaakil horleh, waxaana fudud in aad isku qanciso in aad buuran tahay ama aad dhuuban tahay, taasina ay kugu kellifto in aad si aan habboonayn ula dhaqanto jidhkaaga.

Jidhkaaga waxa ku kaydsan dhammaan afkaartaada dareennadaada iyo sifooyinkaaga, isagu [jidhkaagu] haddii aanuu badqabinna ahaan maysid qofka aad tahay, sidaas darteed haddii aad rabto in aad wax ka beddesho, ku soco oo sida ugu habboon wax uga beddel, laakiin waa in aad niyadda ku haysaa in aanad arrintaa u samaynaynin in aad cid kale isku jeclaysiiso ama cid kale kuula dhacdo ama aad u farxad geliso qof gaar ah, qofka qudha ee jidhkaagu khuseeyaa waa adiga, cidina xaq uma laha in ay kuu sheegto in jidhkaagu uu jalaqsan yahay ama in uu kala daadsan yahay toona; haddii ay kaa waayaan sida ay rabaan, waa mid iyaga u taalla!

Jacaylkayga ayaan kuugu deeqayaa markasta naftaydaay.

“

**Xakamaynta naftaadu waxa  
ay ka bilaabantaa  
xakamaynta afkaartaada,  
haddii aanad xakamayn karin  
waxa aad ka fekerayso ma  
xakamayn kartid waxa aad  
samaynayso.**

”

Naftaydaay gacalo:

Waxa aan ogaaday in dejinta hadafyadu ay u wanaagsan tahay qorshaynta horumarkaaga, halka caadooyinka maalinlaha ahi yihiin waddada lagu xaqiijinayo hadafyadaas. Waa suurtagal in hadafyadu ay kuu sheegaan jihadii aad aadi lahayn ama si ku meel gaadh ah in hore kuugu riixaan, haddana ugu danbaynta nidaam caadeed toosan oo si wacan loo diyaariyay ayaa guusha dhabta ah xaqiijiya. Nidaam aad raacdo in uu kuu degsanaado waa muhim, nidaamkaas in aad ku toosnaatana waa waxa farqiga iyo macnaha samaynaya.

Maamuus kasta waad u qalantaa naftaydaay.

“

**Marka aad dareento in aanad  
intaas ka badan sii wadi  
karaynin dedaalka, dib u  
xasuuso sababtii aad markii  
horaba u bilawday hawshan.**

”

Naftaydaay gacalo:

Samirku waa saaxiibkaaga ugu fican. Haa, waxa ugu badan ee ay tahay in aad marwalba xasuusnaato waa in samirku uu yahay saaxiibkaaga ugu fiican. Samir yeelo marka aad nololahaada ka saarayso dadka, fikradaha iyo habdhaqannada aan habboonayn, naftaada u debecsanaw oo u tudh marka aad ka fogaanayso waxyaabaha aad la soo qabsatay nololahaada oo dhan, naftaadana si toogan u dhiirrigeli si aad u xaqiijiso yool kasta oo ka mid ah yoolahaada nololeed.

Waan kuu tudhayaa markasta naftaydaay.



“

**Ku raaxayso waxyaabaha  
yaryar nolosha, maalin  
maalmaha ka mid ah ayaad  
dib soo fiirin doontaa kadibna  
aad ogaan doontaa in ay  
ahaayeen waxyaabaha  
waaweyn.**

”

Naftaydaay gacalo:

ogow in qofka ugu saboolsan dadka dhaqaale ahaan uu marar badan noqon karo midka ugu hodansan marka ay arrintu joogto jacaylka, dhoollacaddaynta, farxadda, xasilloonida, gobannimada iyo u dhowaanshaha Ilaahay; sidaas darteed markasta xasuusnow waxa muhiimka ah nolosha iyo waxa lagama maarmaanka ah.

Ku raaxayso islamarkaana ka faa'idayso dhammaan walxaha wanaagsan ee aad haysato, laakiin xasuusnow markasta in farxadda iyo jacaylka dhabta ahi ay ka yimaaddaan gudaha. Samayso farxaddaas, jacaylkaagana dadka la wadaag, qalbigaagana ka buuxi wanaagga iyo jacaylka Rabbi. Marwalba qalbiga ka noolow, markaas ayaad garan doontaa sida loo noolaado nolol farxad leh e.

Waan ku jeclahay marwalba naftaydaay.

“

**Naftaydaay gacalo, cadhadu  
waa astaan, astaan kastaana  
waxa ay mudan tahay in loo  
fiirsado.**

”

U fiirso naftaydaay:

Dad badan ayaa aaminsan in xakamaynta cadhadu ay tahay sidii aad u cabudhin lahayn cadhadaada, laakiin in aanad cadhoonin gebi ahaanba ma aha arrin caafimaadka u wanaagsan; waayo cadhadu waa arrin dabiici ah si kasta oo aad isugu celisana dibadda ayay u soo baxaysaa. Ujeedada dhabta ah ee xakamaynta cadhadu ma aha in aad cadhadaada cabudhiso, ee waa in aad fahanto farriinta ka danbaysa dareenkaas, iyo in aad u soo bandhigto hab habboon iyada oo aan arrintu farahaaga ka baxaynin. Marka aad sidaas samaysid, ma dareemi doontid uun dareen wanaagsan, ee xitaa waxa aad helaysaa baahiyahaaga iyo waxyaabaha aad rabto, waxaanad awood u yeelanaysaa maaraynta khilaafyadaada iyo xoojinta xidhiidhadaada.

Barashada Xakamaynta cadhadu waa wax adag oo u baahan dedaal badan, laakiin markasta oo aad ku tababarato waxa ay kuu noqonaysaa wax fudud, faa'idooyin badanna waad ka dheefi doontaa. Barashada xakamaynta cadhadaadu iyo in aad u cabbirto habka ugu qummani, waxa ay kaa caawinaysaa in aad dhisto nolosha xidhiidho wanaagsan iyo in aad xaqiijiso hadafyadaada oo aad ku noolaato nolol qanaaco leh oo aad raalli ku tahay.

“

**Waan kugu kalsoonahay  
naftaydaay, waanan ku  
aaminsanahay.**

”

5 waxyaabood oo ay tahay in aad maalin walba xasuusnaato naftaydaay:

- Wixii tegay way tageen.
- Aragtiyaha aynu dadka ka haysannaa markasta xaqiiqo maaha.
- Qofkasta safarkiisa nololeed waa mid gaar ah oo dadka kale ka duwan.
- Waqtiga ayaa daweeya waxkasta.
- Farxaddu waa doorasho!

“

**Naftaydaay gacalo, dadka oo  
dhan ayay soo maraan  
maalmaha adagi,  
muhiimaddu waa in aynaan  
ku soo celcelin khaladaadkii  
hore; khaladaadkii  
maalmaheenna adkeeyay.**

”

Naftaydaydaay gacalo, naftaydi hooyada noqotayeey:

Waan ogahay in hooyannimadu ay tahay marxalad amankaag leh; maadaama ay hooyannimada weheliyaan dareemo badani, oo keliya dareemi maysid jacayl iyo farxad uun, ee sidoo kale waxa aad dareemaysaa dareenno adag sida werwer, isku buuq iyo daal. Ha werwrin hooyooyinka oo dhan ayaa sidaas dareema. Hawl fiican ayaad qabanaysaa, waan ogahay in aad dareemayso sidii aad tahay hooyada adduunka ugu xun, laakiin i rumayso, caruurtaadu marwalba way ku jeclaan doonaan ee jacaylkaaga ugu deeq, waxa qudha ee ay marwalba xasuusan doonaan waa taas.

Noqo hooyada caruurteedu ay khajilaan marka ay dhunkanayso iyaga oo iskuulka u socda, ama u sii qor farriimo yaryar oo shandada ugu rid si ay u akhristaan waqtiga nususaacaha; xitaa waxyaabahaas yaryar ayaa jacaylkaaga tusaya. Laga yaabaa in aanay waxyaabahaas tixgelin marka ay yaryar yihiin, laakiin marka ay xasuustooda dib u soo celiyaan iyaga oo waaweyn, ma doorbidi doonaan in waxyaabahaasi ay u dhici lahaayeen si sidaas ka duwan, macno weyn ayayna u samayn doonaan. Xasuusnow in hooyannimadu ay mararka qaar u muuqan karto shaqo, laakiin xaqiiqadu waa in tahay awood iyo dheeraad lagu siiyay. Maalmo wanaagsan iyo maalmo xunba way ku soo mari doonaan, maadaama hooyannimadu labadaba ay wadato, laakiin ka dhig inta karaankaaga ah sida ugu wanaagsan. Jeclow caruurtaada jacayl bilaa shuruud ah, naftaadana ha illaawin inta aad hawshaas ku guda jirto, xasuuso qurux badanna samee.

Hooyo cajiib ah ayaad tahay naftaydaay.



“

**Cidna kama hoosaysid  
kamana liidatid ee maanka  
ku hay.**

”

Naftaydaay gacalo:

Waxaad leedahay xirfado iyo hibooyin qurux badan oo ku habboon shakhsiyaddaada, xoogna waad ugu hamuun qabtaa in aad si adag u shaqayso oo aad barato xirfado cusub, sidaas darteed isku kalsoonow, waxa jiri kara waqtiyo aad isku hungowday oo aad gashay khaladaad, laakiin maxaa diiday in aad iscafiso? Maxaa diiday in aad kalsoonidaada dib ugu dhiso isla sida aad uga caawiso dadka kale in ay dib u dhisaan kalsoonidooda? Miyaanad adiguba u qalmin intaas?!

Ma garan kartaa sifada ay wadaagaan dhammaan dadka guulaystay ee cagta la helay dhabbada aad adna ku socoto? Waa joogtaynta; isma dhiibaan marna, adna ma tihid qof isdhiiba weligaana maad noqon qof isdhiiba; sidaa darteed hore u soco, tallaabadana hore u qaad waad gaadhi doontaa ujeedadaada e.

Jacaylkayga ayaa kula jira naftaydaay.

“

**Haddii aad rabto waqti,  
xorriyad iyo tamar dheeraad  
ah, bilaw adeegsiga erayga  
"Maya".**

”

Naftaydaay gacalo:

Ixtiraam tamartaada oo isu tudh, marka ay khasab noqoto in aad hawlaha oo dhan joojiso oo aad dib u soo kabato samee sidaas, dunidu waa goob waalan abaalna kuguma laha ee naftaada ha caddibin, markastana khasab maaha in aad goobjoog ahaato; dhibi kuma jirto in aad dadka ka dhex baxdo muddo si aad naftaada ula xidhiidho waqtina ula qaadato.

Daryeel badan ayaad mudan tahay naftaydaay.

“

**Marka ay ku soo maraan afkaar  
tabani, kuguma filna  
in aad keliya u dulqaadato afkaartaas,  
ee waxa iyana muhim ah in aad ku  
beddeshid afkaar togan  
oo raynrayn leh.**

”

Naftaydaay gacalo:

Waxaa jirta odhaah qadiimi ah oo tidhaahda " waxa aad tahay waxa aad cuntid", iyada oo laga yaabo in ay sax tahay haddana waxa ay ila tahay in ay ka sii

habboon tahay: "waxa aad tahay waxa aad ku hadashid!", waayo ereyadu waxa ay leeyihiin awood cajiib ah, dhawr eray oo fudud ayaana kor u qaadi kara oo shidaal u noqon kara kartida qofka ama hoos u dhigi kara waxqabadkiisa! Ereyada aynu ku hadalno saamayn toos ah ayay ku leeyihiin nolosheenna, waxaan aaminsanahay haddii aynu caadaysanno adeegsiga hadallo wanaagsan oo aynu kula hadalno dadka kale iyo nafteennaba, in aynu ku noolaan doonno nolol qurux badan.

Dhanka kale haddii aynu nolosheenna adeegsanno ereyo taban dadka kalena aynu ku jeesjeesno waxyaabo xunna aynu ka sheegno iyaga oo jooga ama maqanba, ama aynu nafteenna kula hadalno ereyo ay ka mid yihiin "waxba kuma fiicni", ama "noloshaydu way kala daadsan tahay", sidee ayanu u rajayn karnaa in aynu ku noolaanno nolol togan oo wadata raynrayn iyo xasillooni?! Afkaarta iyo ereyada tabani waxa ay abuuraan nolol xun!

Wanaag badan ayaan kuu rajaynayaa naftaydaay.

“

**Naftaydaay gacalo, guushu  
ma aha wax geed ka go'an ah  
(la hubo), guuldarraduna ma  
aha wax aan laga soo kaban  
karin, geesinnimada hore  
loogu sii soconayo ayaa se  
ugu muhiimsan.**

”

Naftaydaay gacalo:

Haddii ay inuun micno kuu samaynayso, ogow in aan marnaba waqti kaa tegin si aad u noqoto qofka aad rabto in aad noqoto habeen kaama tegin. Ma jiro waqti cayiman, jooji dedaalka marka aad doonto, oo waxa aad awooddaa in aad isbeddesho ama in aad sidaada ahaataba, ma jirto xeerar sandulle ah oo arrintan u degsani. Sidaas darteed waad awooddaa in aad qodobkan uga faa'idaysato sida aad rabto, ama waxa aan rajaynayaa in aad ka faa'idaysatid!

Waxa aan rajaynayaa in aad aragto waxyaabo aad la ashqaraarto, waxa aan rajaynayaa in aad dareento dareenno aanad hore u dareemin, sidoo kale waxa aan rajaynayaa in aad la kulanto dad u fekeraya si ka duwan sida aad u fekerto.

Waxa aan rajaynayaa in aad noolaatid nolol aad ku qanacsan tahay, haddii aad is aragto in aanad ku qanacasanaynna, waxa aan rajaynayaa in aad yeelatid awoodda aad waxkasta dib ugu bilaabi lahayd mar labaad.

Guulo badan ayaan kuu rajaynayaa naftaydaay.



“

**Naftaydaay gacalo, Noloshu  
gebigeedaba waa in aad  
saamayn wanaagsan yeelato;  
gaar ahaan naftaada ku  
yeelato.**

”

Fiiro gaar ah:

Jeclow naftaada adiga oo daallan,

Jeclow naftaada adiga oo daciif ah,

Jeclow naftaada adiga oo khalkhalsan,

Jeclow naftaada adiga oo kala daadsan,

Jeclow naftaada inta aad dib ugu istaagayso cagahaaga.

“

**Barasho ayaan ku jiraa si aan  
u noqdo qofka ay ii sheegayso  
ruuxdaydu in uu aniga yahay.**

”

Naftaydaay gacalo:

Jidhkaaga daryeel markasta; quudi jimicsi u samee oo ula dhaqan sida ugu habboon, sidaas oo ay tahayna ruuxdaadu ha noqoto halka aad ka dhaqaaqdo; ruuxdaada qurxiso. Ruuxdaas quruxda badan ee wanaagsan ee gudahaaga ku jirtaa, iyadaa ah waxa ugu muhiimsan. Ruuxdaas ashqaraarka leh ee xooggani waa midda ku siinaysa nolol. Ruuxdaas faraxsan ee naxariista badani waa waxa ku siinaya laba baal oo aad samada ugu duushid, waana midda kuu furaysa janno aad ku noolaatid.

Si walba waan kugu oggolahay naftaydaay.

“

**Ugu noolow noloshan sida  
aad rabto, hana ka cabsan  
inaad si buuxda u noolaato.**

”

Naftaydaay gacalo:

Waad ka caqli badan tahay sida aad ismoodayso, waana iga dhab! Maxay micno leedahay in waxbarashadu aanay kuugu fududayn sida ay ugu fududdahay dadka kale?! Tani kaama dhigayso qof ka garaad yar midka fadhiya dhinacaaga fasalka; sidaas darteed marka danbe ee aad keligaa fekarayso is xasuusi intan.

Waxa uu yidhi Albert Einstein: "qof kastaaba waa mid caqli badan, haddii se aad kalluun ku qiimayso awooddiisa iyo kartidiisa in uu fuuli karo geed iyo inkale, waxa uu ku dhammaysanayaa noloshiisa oo dhan isaga oo isu arka doqon aan waxba ku fiicnayn!"

Qof walbaa waa mid caqli badan, adiga ayayna kuu taallaa qaabkii aad taas u soo bandhigi lahayd, ee maxaad ku wanaagsan tahay? Waa maxay shayga aad dadka kale kaga fiican tahay? Hel majaalka aad ku wanaagsan tahay dunidu iyada ayaa kuu niikinaysa e, sidoo kalena xoogaa dedaal ah la kaalay marka aad xiisadda joogto, illeen sabab baad u joogtaa meesha e!

Jacaylkayga iyo ixtiraamkayga oo wada socda iga guddoon.

“

**Mararka qaar fogaantu ma aha  
daciifnimo, ee laga yaabaa in ay tahay  
awood, waayo uma fogaanno si  
ay dadka kale u gartaan  
qiimaheenna, ee waxa aynu  
u fogaannaa in aynu ugu danbayn  
garannay qiimaheenna.**

”

Naftaydaay gacalo:

Ka fogow dadka ku niyadjebiya.

Ka fogow murannada aan weligood xallismaynin.

Ka dheerow ka farxinta dadka aan weligood ku qiimaynaynin.

Markasta oo aad ka fogaato waxyaabaha sumaynaya ruuxdaada, waxa aad noqonaysaa qof awood badan.

Waan ku jeclahay.



“

**Naftaydaay gacalo, waa caadi  
in mararka qaar lagu waayo  
oo aad dadka ka dhex baxdo.**

”

Naftaydaay gacalo:

Booqashada baraha bulshada, eegista farriimaha kuu soo dhacay, daawashada sawirrada Instagramka, iyo rogrogista waxyaabaha degdegga ah ee Twiterka la soo dhigo, iwm, waa qayb ka mid ah nololmaalmeedkeenna. Laakiin haddii aanad xakamaynin waqtiga aad ku qaadanayso meelahaas, waxa aad is arkaysaa waqtigii oo socday iyo adiga oo aan waxba qabsan. Sidaa darteed xeerar u deji isticmaalkaaga, dawanka (Alarm-ga) ku save garayso waqtiga aad joojinaysid, iska xidh app-kaas oo wax kale qabo, ama soo gal khadka keliya waqtiyada aad dhamayso hawlahaaga si aad uga dhigato abaalmarin iyo nasasho.

Waqti tayo leh ayaan kuu rajaynayaa naftaydaay.

“

**Shalay mid caqli badan ayaan  
ahaa maadaama aan rabay in  
aan dunida beddelo, maanta  
waxa aan ahay mid waayo  
arag ah sidaas ayaan u rabaa  
in aan naftayda beddelo.**

”

10 su'aalood oo ay tahay in nafta la weydiyo:

1. Waa maxay waxyaabaha noloshayda ku jira ee aan aniga iga turjumaynin?
2. Muxuu qalbigaygu ii sheegayaa ee aan iska indhatirayaa?
3. Markee ayaanan naftayda runta u sheegin? Waayo?
4. Waddada saxda ah ma ku suganahay?
5. Maxaan maanta samayn karaa si aan berri u noolaado nolol fiican?
6. Ma ahay qof ay dadka kale agtiisa farxad ku dareeman?
7. Waxkasta ma si shakhsi ah ayaan u qaataa (ma cuqdad baan qabaa)?
8. Waa maxay waxa ugu weyn ee aan naftayda ku jeclahay?
9. Ma u jecelahay naftayda si la mid ah sida aan rabo in dadka kale ay ii jeclaadan?
10. Maxaa iga farxiya?

“

**Cabsida iyo kalsooni darradu  
waxa ay dilaan riyoooyin ka  
badan kuwa ay disho  
guuldarradu.**

”

Naftaydaay gacalo:

Doorashooyinkaaga nololeed waxa ay micno samaynayaan marka aad ku xidho doonistaada iyo riyoooyinkaaga. Doorashooyinka ugu fican ee ugu dhiirrigelinta badanina waa kuwa la jaanqaadaya hadafkaaga naftaada iyo qiyamka aad aaminsan tahay. Sidaas darteed marka aad arrin ku dhaqaaqayso, isweyddii sababta aad waxan u rabto, haddii kale waxa aad is arkaysaa adiga oo si fudud isu dhiibay!

Daacad baan kuu ahay naftaydaay.

“

**Kalsoonidu albaabo ayay kuu  
furtaa, islaweyniduna waa ay  
kaa xidhaa.**

”

Naftaydaay gacalo:

Farqi weyn ayaa u dhexeeya qofka isku kalsoon ee naftiisa qaddariya iyo midka isla weyn. Dadka naftooda sida saxda u qaddariyaa waxa ay u fekeraan sidan: waan qurux badanahay, laakiin way jirtaa cid iga qurux badani, halka dadka isla weyni ay dhahaan ama u fekeraan qaabkan: waan ka qurux badanahay qofkasta oo aan aqaanno!

Qofka isku kalsooni naftiisa waa la heshiis, iyadoo ay jirto in uu naftiisa oggol yahay haddana wuu garanayaa waxa uu ku liito iyo waxa uu ku fiican yahayba, wuuna og yahay in ay jiraan waxyaabo badan oo ay tahay in uu ka barto dadka kale, waxaanad arkaysaa dadkaasi in ay isdhuldhig badan yihiin marka ay la dhaqmayaan dadka kale.

Halka isla weynidu ay ka soo maaxato qaddarin nafeed aan caafimaad qabin; kuwa islaweyni waxa ay la halgamayaan xasillooni darro gudahooda ah, islaweynidu waa in aad marwalba ku dedaasho in aad dadka ka sare marto, islaweynidu waa in aad ku dedaasho in aad marwalba hesho danaynta iyo hadal haynta dadka kale, sidoo kalena dadka islaweyni uma dulqaadan karaan dhalliisha togan markastana waxa ay naftooda barbar dhigaan dadka kale. Sidaas darteed naftaydaay noqo mid si qumman isu qaddarisa, mid isku kalsoon haddana isdhuldhig badan.

Kalsooni badan ayaad u qalantaa naftaydaay.



“

**Toddobada cajaa'ib ee dunidu waa:**

- 1. In aad wax aragto**
- 2. In aad wax maqasho**
- 3. In aad wax taabato**
- 4. In aad wax dhadhamiso**
- 5. In aad wax dareento**
- 6. In aad dhoolacaddayso**
- 7. Iyo in aad wax jeclaato.**

”

Naftaydaay gacalo:

In aad buug iibsato oo meel iska dhigto iyo in aad iibsato oo waqti aad ku akhrido u hesho waa laba arrimood oo gebi ahaanba kala duwan. Marwalba iyo meel walba waad heli kartaa waqti: adiga oo tareen saaran, adiga oo bas saaran, adiga oo doon fuushan iyo adiga oo meel cid ku sugayaba. Markasta oo aad wax badan akhrido, waa markasta oo aad wax badan barato tijaabooyinka dadka kalena aad casharro kala baxdo, oo waxa aad baran kartaa waxyaabo toban sanno kugu qaadan lahaa saacado gudahood adiga oo akhrinaya buug qoraaga ku qaatay toban sanno oo waayo aragnimo ah si uu xogtaas isugu dubbarido. Marleyba qorayaashu waa ay kuu qabteen hawsha intii adkayd, ama wax ka baro buugga oo akhri ama iskaga tag adiga oo aan kala furin e.

Nasiib wanaagsan naftaydaay.

“

**Nolol qurux badan haddii aad  
doonayso naftaydaay,  
caadooyin wanaagsan  
samayso.**

”

Naftaydaay gacalo:

Waad og tahay in ay jiraan dad ku danaynaya oo ku jecel, ee maxaad uga werweraysaa in aad culays ku noqoto? Waan hubaa in aad leedahay saaxiibbo diyaar u ah in ay ku caawiyaan markasta, saaxiibo aad marar badan u hagarbaxday, iyaguna ku faraxsan in ay ku garab istaagaan oo ku caawiyaan markooda; ee maxaad uga cabsanaysaa in aad caawimo weydiisato?! Waad og tahay in dadka qaar ay waxkasta u samayn karaan adiga dartaa, laakiin sidoo kale waxa aad og tahay in iyagana ay haystaan duruuflooda gaarka ahi, oo ay lagama maarmaan tahay in aanad culays la soo doonan adna, laakiin ma aha in aad sidaas samayso!

Wax badan ayaad samaysay, wax badan ayaad dadka kale u qabatay, ee maxaa diiday in adigana lagu caawiyo markaaga? Sida aan hore kuugu sheegay, waxa jira dad in ay ku caawiyaan ha joogtee xitaa ku farxi doona in ay kuugu debecsanaadaan oo kuugu hagarbaxaan isla sidii aad u samaysay markoodi. U oggolow in ay ku jeclaadaan, sidaas ayay doonayaan, dhab ahaanna way ku jecel yihiin e!

Garab istaag kasta waad u qalantaa naftaydaay.

“

**Aqbal oo istareex ku dareen  
in aanad ogayn waxa soo  
socda mustaqbalka, laakiin  
sidoo kale ogsoonow in  
waxkasta oo yimaadda aad  
maarayn karto.**

”

Naftaydaay gacalo:

Fadlan jidhkaaga ha odhan waa daciif, waayo waqti dheer ayuu soo halgamayay, sidaas ayuuna ka yahay mid ka mid ah waxyaabaha ugu xooggan ee aad weligaa aragtay. Wax badan ayuu u soo dulqaatay in badanna wuu soo adkaystay, ha na illaawin in soo kabashadu ay tahay hawl si gaabis ah u dhacda. Fadlan ha dareemin qoomamo iyo niyadxumo maadaama aanad ahayn saaxiib, gabadh iyo shaqaale dhamaystiran oo bilaa iin ah. Wax badan oo aan suurtagal ahayn ayaad samaysay si aad noloshaada u sii wadato haddana waad guuldarraysatay, waxaanad gashay dagaal aan waxba la iskula hadhin, laakiin dibdhacaagu waa diyaargarow iyo soo laba kaclayn uun, maalin maalmaha ka mid ah ayaanad guulaysan doontaa, markaas ayaad fiirin doontaa dhaawacyada jidhkaaga adiga oo ku qaylinaya: "waan guulaystay!".

Ha is nicin naftaydaay, jidhkaagana ha nicin, lugahaagu waxa ay ku sideen xilliyadii ugu adkaa noloshaada, gacmahaaguna waa kuwo xooggan sidoo kale, sidaas oo ay tahayna waa kuwo debeansan oo loo adeegsan karo laabgelinta cidda aad jeceshahay. Marka aad dib uga soo kabato guuldarradan, waxa aad dareemi doontaa in ay tahay guushii ugu weynayd ee aad weligaa dhadhamiso, waxaanan kuu ballanqaadayaa haddii aad isqaddariso oo isqiimayso mar labaad in jidhkaagu uu markale iftiimi doono, xagtimaha dushaada ku yaallaana ay caddayn u noqon doonaan in aad guulaysatay; sidaas darteed mustaqbalka u hanwaynow oo markasta mahadnaq.

“

**Marka aad keligaa  
lugaynaysid ha eegin  
cagahaaga hoostooda, ee eeg  
gudahaaga, si aad u ogaatid  
awooddaada.**

”

Naftaydaay gacalo:

Haddii aanay cidi hore kuugu sheegin, aan kuu sheego hadda: "waan ku jeclahay".

Waan jeclahay sida aad u dhoolacaddayso dhoolacaddayn daacad ah. Waan jeclahay qaabka aad u daryeesho dadka aad jeceshahay; ee aad waqtiga ugu hesho si kasta oo aad mashquul u tahay. Waan jeclahay qaabka aad u aaminto in wax wanaagsani ay dhici doonaan xitaa iyada oo u muuqata in aanay suurtagal ahayn. Waan jeclahay qaabka aad u aaminsan tahay dadka iyo in markasta gudahooda wanaag uu ku duugan yahay. Waan jeclahay qaabka aad u dhegaysato dadka, marka ay kaaga sheekaynayaan qisooyinkooda. Waan jeclahay sida aanad dadka u xukminin markiiba ee aad dhankooda wax uga eegto. Waan jeclahay qaabka aad u eegto dadka indhahooda ee aad u ogaatid in ay wax badan ku qarinayaan qalbiyadooda; ugu qarinayaan caqabadahooda iyo xanuunnadooda.

Waan jeclahay qaabka aad u aaminsan tahay nolosha iyo in ay jiraan waxyaabo badan oo weli u baahan in la daahfaydo.

Waan jeclahay sida aad u jeceshahay waxbarashada ee aad u xiisayso in aad marwalba wax cusub baratid, ka baratid nolosha iyo dadkaba. Sidaada ayaan kugu jeclahay nafyahay, waayo sida aad og tahayba mid dadka kale ka soocan ayaad tahay.

Xushmad weyn ayaan kuu hayaa naftaydaay.



“

**Dhammaadka maalinkasta  
xasuusi naftaada, in aad  
qabatay intii aad  
awoodaysay, taasina ay wax  
weyn tahay.**

”

Fiiro gaar ah naftaydaay:

Ku gebagabee maalintaadi feker togan marwalba, waayo si kasta oo xaaladuhu u adag yihiin, berri waxa jirta fursad wax uun lagu hagaajin karo.

Waan ku jeclahay si walba iyo xaalad walba.

**DHAMAAD**

